



HOGHOL

Dooqaadky Af Soomaaligy - Maayky - HOGHOL Soomaali Maay Newsletter
| **Bil'ly - Monthly** |

Walaa Tirooduung ki jero

- Taariikdy Jamaa'atha Baardheere (1-2)
- Qeepoo Dooqaadky (2-3)
- Heesty Abwaan Tarash (3)
- Magmaag (3-4)
- Dhaghanky (4)
- Manaahijta walbarashoothy Dowladda Federaalky (5)
- Wargiling (5)

Tifaftiry: Abdullahi Sheikh Mahamad

Aasaasy - Founder

Goobty Horumariyoky Afky Maayka (Afmaay Development Center), maay la aasaasy sanadky 2017. Sababty liing aasaasy maaybuwaaha horumariyowky afky ii dhaganky Maayky (Af-Soomaaligy Maayky).

Maay ha dhawaayaanee dhammang dadky ky howling horumariyowky afky-aayow, Af-Maay.


Abdulkadir Abukar Sheikh, Founder Af Maay Development Center (ADC)

Email:

afmaaydevelopmentcenter@gmail.com

Facebook: <https://www.facebook.com/afmaaydevelopment/>

Office: Baidoa, Sheekh , S/Land, Muqdishu i i Örebro, Sweden.



Taariikdy Jamaa'athy Baardheere: Qeegtii 2aad Baardheere Historia=Baardheere History

Sheikh Aly Dhurry: Ulul-Amrihii 2aad (30 sinny 1776-1806)

Hooloy usu bilaaby Sheikh Ibreeng Hassan Yabbarow oofsishidiis ky demby wey hor ing sii wedey Sheikh Aly Dhurry oo ky mid haayi dadkii asaasiyaaky jameeadda oo safarky dheer ha gali. Markii usu hogaanky ly wareegy Sheikh Aly Dhurry, wey islamarkiiäba bilaawey in usu billaariy dhismydy degaank ii ing usu sugo nebbedly si dadky nebbed inskly nooladan isly markaasny ing suuryagaly ind diinty layky fidiyi degaanky i baadiya ing dhow.

Dad badang oo diing ing gorodaany iya si isdaby roogh eh hang galy diinty islaamka dadkaas oo ky tirsinaayi deggane ing dhow Baardhere i meel eed ingky durugsing. Tusaaly haang fidinty i saameynty Jameeada Baardheere weyba deertey barry haang illaa 'Barawe' dhinnygy orsy



illaa degaanka ‘Oombaley oo ky taaly degaangky ‘Weejid’, dhinnigy tukud amy waqoo(?) degaanky ‘Luuq, illaa ‘Iimoy’. Ulumaady jameeada Baardheere wayba bilaaweeny mashruu lyky fidiyow ku dhaqanky islaameed.

Wey qaadidaayeen dhar-edd, sida qamiis ama shaati-dheer. Bilaangty kuffa galidaasy (luga-gashi). sidaas datiyey dadky jameeada weyba liing kasaayey *ambuurey*.

Markii jameeada billaarity diing i deegaan haanby wey ha bang behey dad adow ing ariggy maamulk Jameeada oo ky masalan diidy iny hoolo nool sidy geel, lo’, erig i misigeedy beero ky biyaang zekaady luku waajibiyi. Dadkaas falkaas suubiyi weyba hormood ing haayey reero deggaw ‘Oombaley’.

Oombaley tirtirinti haddy, laking weba ky taaley degaank Weejid ii Tiyeeglow dhatiyo. Reer Oombaley weyba ha weerareena jameeada Baardhere iyo nidaamky ky saleysinaayi diinty islaamk. Saas dartiye Sheikh Aly Dhurry weyba amarey in lyky horseedy dadky duullaanky ky ah. Ku reed wal uis hor fadheedy weybaany oggoladeen inii sekady biyaang, waany ing hogaansymaan awaamirty jameecada Baardhere. Baardhere wiinaty, maamulshe fidy. Dhul degaameedk liing kasow Dooy, Harqaan iyo Bay way walbaryshy ii ilmy ing weydiisidaayeen baardheere. Sheikh Aly dhurry weyba ulul-amry haayey 30 sinny, reed Ally oofsidy, weyba luku duugey misaajidka jaamaa wiing ee Baardhere reedshey.

Diaariyng: Omar Abdulqaadir Sh. Abdirahmang

Qeepoo Dooghy: Horgaly (preposition)

Horgaly maybuwaa erey ku mid eh qeepoo Doodhisky afky Maayky, sithy afaf bathang o adunyaathy ku jiraan, weyna hor ku galee falky (verb). Sithy Af Soomaali Maxaa tiriggy, maghy haang maay ky haboonyaa ereyky (**horgaly**) sithy afafky Ingriisky i Iswiidishky kaas o li mac’na eh “**preposition**”. Laakiing marky eryky li ma’anna eyi meeleeeye, may tilmaamee ama sheeghee goob, meel i ammag amy wakti. Sithaas dartiye maybaa ky haboona ing li istimaalo ereyky “**Horgaly**” kaas o timlaamow shey wal ku hormarow.

Tusaaly: Afky Maxa Tiri, wey leyaa afar Horgalyaal, sithy (**u, ku, ka, la**).

Maxammed wuxuu u socdaa guriga.

Cabdi wuxuu **ku** socdaa baaskiil.

Isagu wuxuu **ka** yimid Hargeysa.

Sithaas haatoow, Af. Maayky may leyaa ilaa i afar **horgaly** sidy (**ku, ing, ly, ky/ki,**), haanaas o muujhiyaayang inii eed iniisky dhowiing Maay tari I Maxaatiri. Wey luky yaabee inii jeraan haano kale, oo ing baahan ilmi baaris dhiniggy luqaddy liky suubiyo horgalky Afky Maayky.

Alaamadoo liky kasow **horgalky** may ku mid ehaa inii wal ku sheeghaaw meel, me eh wal is bedelaaw o xaaladda ama waqtiga weerty saameeyaaso. Inta badan horyaalee way hor ku galaayaany falky (verb).

Tusaaly:

Omar wey **ku** kooyee dugisigy.

Ali wey **ly/li** jiree saahiibsheey.

Ahmed wey **ing** jeedee misaajidky.

Gurigy ay **ki** jere?

Wey kaloo jiree ereyo oo dad kaly oo luqadoo qaar ing isticmalyaan horyaaly/meeleeye laakiin ing haayny horyaal.

Tusaaly: Kor, hoos dhini, ag, dhamaatiyoony weybu waa maga'. Sababtoo e' wey gadaal ku galo karee qodob, sithy magaayaaky o kale. Kor – Korka, hoos – hoosty.

Diyaaring: Abduqadir Abukar Sheikh Dhaalib

Soomaali (Maay Hees, Maxaa Hees); Swedish sång, English Song Hees li maghy bahi Gooriyoow Garaa

Gooriyow garu	Gugooyowky i
Gygalapoowkaa	Gardory e ma
Ol ho lygalaw	Geeynuung i heera jeri Lingky guthypaany
Ulmaathy wal garab maraayi	Ariirny wal guthupaayi
Waayel gopoowi i bilaang	Mal gooriyaany
Boosty garguurythaasy	Ki hundhoolly geb e
Lang mysaajid gali I	Emaany galang Malky daarany
Lang sanaa gorythaw	Gopiitoothy I heesaaghy Gurbaang dhow mal dilaany
Geper ly kufsythaw i hattiny	Naasoshe lygooyaw Mal goronee
Lamby geethaghi apuuri ley	Ini meraashey galantis Kygurythaw ogaathoy

Halabuurkii Afyaal Mahamud H. Mahamad (tarash) **Abughaalkii**

Magmaag (Ordspråk): Ash me'eh, eber ye ku roong

Magmaagdduung may timaamaasee wal sithii luku fathaayii omboo luku sughaayii ing naghane ama ing ahaayne oo liis arro hooby sitha ing haayne eber haatoo dhaante ama ku roong. Tusaale ahaang wal bathang yee meelo bathang lahaku qaathitho kore sitha: Qof qof kale wal ama deeg ku sughaayi reed wal usu ing filathaani li siyi maayba dhiyo kortee inii usu diitho oo ing qaathina oona is erra intii walaa li siyi lii arra lahaayi oo haatoo iing roong. Beerowaa la abuuray roobaa li sughaayii, fashiigdowaa beero dhowti, reed langaa beero ha fiiriyee may ha aragheey wal roob liingki sheegho korene oo abuurkilleey hallaayaaw; Maddii li warsatho hibiloow roobka ku warrang maaybaa arreeyee roobka ash ma haayne abuur haallaywu ingkooynee roonaayti. Onog ibna aadding may luku fatheey inii usu aqli lahaatho si usu aduugny ing dhagho. Onog ILaaheey aqli dhimminaang ki

abuuri dadaky may arraayaanaa ash me e' oo liingki qariyaaw aqlisheey mu buuho. Reer (qooy) dhising oo dhaghankii ku hallawi oo aawky ii atha is eethaayaang hibiloow ash me eh omboo hibileey ash me eh yee is araayaang siiba maddii owlaad iniis dhalawaayaang. Afyaal Salahal Maalling Iisy (IIN) ye may erreey "atha i islaantaa isingkoo arraawasaang, hoo atha eleeng deesho iyeena atha ki deyaaso, hoo atha iye deeshoona meel kale li deyaaw. Sithaas hoo iddy ky seetaang nolol taasaa erre walaa kale ash me eh"

Diyaaring: Omar Abdulqadir Sheikh Abdurahman

Fasiraad: Abdullahi Sheikh Mohamed

Dhaghang (Kultur): Dalaga beeroo




Misgy shipaal eh

Diyaaring: Abdullahi Sheikh Mohamed




Misgy Karti


Arlaathy Koofur Galbeed misgeethy magiyaal shal geddisingaa liing kasee gopollee shal geddising sithy (misgy, moordy iyo shamuureey). Misgeethy maddii la apuuro o ha dhalato ilaa ku karto heer kastoo roogdo maghaa lety. Maddi ha bato maaybaa la arreeye an-grab doory (ilaa seddi beri), Lammy baally (ilaa 10 beri), galyi dhig (ilaa 20 beri, shipaal (ilaa 30 beri), show qaris (ilaa 40 beri), Uuriithi (ilaa 60 beri), bujhis (ilaa 65 beri), baruury i fool waraaby (ilaa 70 beri), aghaar (ilaa 80 beri), hapuug (ilaa 85 beri), karooow (ilaa 90 beri). Reed wal goosithee shaftaal leey liky goosithaa omboo kor goovleev likv goosishaabv.



Goobty Horumariyowky Afky Maayky
Dooqaadky Af-Maayky



Hogol



Af-Maay Newsletter
Af-Maay Development Center (ADC)
Email: afmaaydevelopmentcenter@gmail.com
Office: Baidoa, Sheekh, S/Land, Muqdishu i Örebro, Sweden



Goobty Horumariyowky Afky Maayky
Dooqaadky Af-Maayky



Hogol



Af-Maay Newsletter
Af-Maay Development Center (ADC)
Email: afmaaydevelopmentcenter@gmail.com
Office: Baidoa, Sheekh, S/Land, Muqdishu i Örebro, Sweden

Wargiling:

Dooqaadky Hoghol maaybaa ha dhawaayee walaaghii taly ii fikirid ky saabsing hurmariyoky Afky-Maayky: Haniikily hariir: Qofkii haayo, qoraaly, taariikdy, suugaanty Afky-Maayky, haniingky dir:

Eamil. afmaaydevelopmententer@gmail.com

Goobty Horumriyowky Afky- Maayky - Afmaay Development Center (ADC)

c/o Sydvästsomaliska Riksförbundet I Sverige

Föreningarnas Hus

Slottsgatan 13A, 70361 Örebro, Sverige

Tel. 019-133110

E-mail: sydvast.somaliska@outlook.com

Manhaj Jangjeero

Manaahijta Walbarashootha Dowladda Federaalky mi dheelitiring.

1- Buugaagty Mahaa tirileey ky qoronyiing

2- Gopolee koofureed afshoo, taariigdiyoo iyo Dhaghanshoo ku moqonyiing buugty taariikdy iyoonaay haang af Soomaalighy addaala dorruwaa hal sahooy

AMDC